SI LA ISAGA ILAALIYO DAAHINTA HAB SOCODKA, FADLAN SI TAXADUR LEH U AKHRI WAXYAALAHA SOO SODA

Tilmaamaha ku saabsan buuxinta codsiga waxaa laga heli karaa xaga dambe ee codsiga. Si la isga ilaaliyo daahinta hab socodka, fadlan HA soo celin codsigaaga adigoon nuqullo dukumiintiga dakhligaaga, dukumintiga amaanada (haddii ay khuseyso), caddaynta da'daada, saxeexaaga, iyo saxiixyada labo (2) markhaati.

Hirgalinta codsigaaga dib ayaa loo dhigayaa (30-45 maalmood ugu yaraan) haddii aadan soo celin mid ka mid ah kuwan soo socda waana in aan kaa codsanaa:

- Caddaynta Dakhli - dhammaan bogagga soo celinta canshuurta federaalka; fadlan ha soo gudbin/fayl gareenin codsiga ka cafiska canshuurta illaa iyo inta uu soo celinta canshuurtaada uu dhameystirmo. Haddii aan IRS kaa rabi inay soo gudbiso/soo fayl gareyso canshuur celinta, soo gudbi 1099-nada (ama qoraalada dhamaadka sanadka) ee dhammaan ilaha dakhliga.
- Caddaynta Da'da ama Naafada (Kaarka Aqoonsiga, liisanka darawalnimada, shahaadada dhalashada, warqadda SS ama Siinta VA haddii aad tahay naafo)
- Saxiixyada (kaaga iyo labada markhaati)
- Cadeynta Mulkiilenimada - haddii aad iibsatay hantidaada kahor 1995, fadlan ku dar warqada hantida, haddii la heli karo. Haddii aadan heli Karin warqada hantida, qor wakhtiga aad iibsatay guriga/hantida.
- Dukumeentiyada amaanada (Trust) - haddii hantidaadu ay ku qoran tahay magaca amaanada, waa inaad ku dartaa amaanada oo dhan ama buuxisaa Shaacinda Amaanada (Declaration of Trust) ee laga heli karo internetka (website-ka wuxuu ku qoran yahay hoosta bogga) ama codso adoo wacaya xafiiskeena.
- Xaaladda dadka kale ee ku qoran warqada hantida ama xaaladda lamaanaha - haddii aad iibsatay guriga/hantida iyada oo dad kale ku qoran yihiin warqada hantida, waxaan u baahanahay inaan ogaano haddii ay degan yihiin guriga aad u codsaneyso. Haddii ay sidaa yihiin, waxaan sidoo kale u baahanahay dakhligooda maadaama ay yihiin kuwo loo tixgeliyo la wadaagayaal guri.
- Haddii aad isqabteen markii aad iibsatay gurigaaga oo aad ka la tagteed/isfurteen markaa kadib ama lamaanahaaga uu dhintay, fadlan ku dar nuqulka warqadda furitaanka ama shahaadada dhimashada.

Si aad ugu qalanto canshuuraha la bixinayo 2019, waa inaad buuxisaa shuruudaha soo socda ee ku saleysan 2018:

- Xadka dakhliga ee ugu sareeya ee soo hara ee xorta ah ee la isku daro $40,000 ama ka yar sannadkii ka horeeyey (2018) (RCW 84.36.383 (5)).
- Markay tahay 12/31/2018, Codsaduhu waa inuu ku qornaadaa hantida iyo ahaadaa (1) 61 ama ka weyn (dhashay 1957 ama ka hor) AMA (2) naafo ah oo aan shaqayn karin.

Haddii aadan buuxin shuruudaha laga bilaabo marka ay tahay 12/31/2018, laakiinse aad buuxin doontaa 12/31/2019 (haddii aad noqoto 61 sannadka 2019 iyo / ama dakhligaaga 2019 wuxuu ka yaraan doonaa $40,000), fadlan weydiiso in lagugu daro liiska boostada ee 2020 iyo waxaa laguu soo diri doonaa codsi kale bisha Janaayo 2020.

Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan barnaamijka, fadlan nagu soo booqo
https://www.kingcounty.gov/depts/assessor/forms.aspx

Macluumaad dheeraad ah ee dib u noqoshada.

Barnaamijka ka cafinta canshuurta waa barnaamij ka cafinta canshuurta hantida ee Gobolka Washington; si fiican loo yaqaan ka dhimista canshuurta hantida. **Haddii aad u qalantid barnaamijkan, weli waxaa lagaaga baahan doonaa inaad bixiso qaar canshuurta hantida ah** – qiimaha waxaa loo go'aaminayaa iyadoo ku salaysan RCW 84.36.383 (5). **Ma awoodno inaan kuu qiyaasno ka dhimis.** Haddii aad u qalanto, waxaa laguu sheegi doonaa heerkaaga ka cafintaada canshuurta, mas'uuliyadahaada adigoo ah qaataha, iyo qiimaha canshuurta haray ka dib marka la fuliyo ka cafinta canshuurta.

Iyadoo aan isticmaalno canshuur celinta IRS si ah qalab lagu go'aamiyo heerka dakhligaaga ee u qalmida, shuruudaha IRS iyo Gobolka way duwan yihiin. Your IRS AGI waa meesha laga bilaabo xisaabinta dakhliga mana aha in loo tixgeliyo si la mid ah wadarta dakhliga guud ee barnaamijkan.

Tusalooyinka hoos ku xusan waa qaar ka mid ah kala duwanaanshaha aasaasiga ah ee aad u baahan tahay inaad ka warqabto marka aad codsaneyso ka cafinta canshuurta hantida/guryaha:

- Khasaarahaaga raasumaalka ee mudda gaaban iyo kan mudada muddada-dheer MA aha ka dhimis ee barnaamijkan ka cafinta cashuurta hantida. Hasa ahaatee, IRS waxay kuu ogolaan kartaa inaad ka goyso/ka dhinto khasaaraha raasumaalka canshuur celintaada dakhliga.
- Barnaamijka MA oggolaanayo ka dhimista qiimo hoos u dhaca. IRS waxay ogolaan kartaa in laga dhimo qiimo hoos u dhaca.
- Barnaamijkan, WAA INAAD ku dartaa lacagaha Amnigaaga Bulshada si ah dakhli si loo go'aamiyo $40,000 ee xadka dakhliga soo hara ee xorta ah ee leyku daray. IRS waxaa laga yaabaa inaysan kaaga baahnayn inaad ku darto Amaankaaga Bulshada si ah dakhliga canshuurta laga qaadi karo.

Wixi dheeraad ah oo gaar ah ee ku saabsan shuruudaha sharciga, fadlan tixraac RCW 84.36.381-387.

Waxaad ku soo celin kartaa codsigaaga dhameystiran oo uu la socdo dhammaan dokumentiyada taageeraya cinwaanka hoos ku xusan:

- Saacadaha xafiiskeena waa Isniinta - Jimco 8:30 subaxnimo illaa 4:30 galabnimo.
- Fadlan ogow – si aad u hesho kaa caawinta codsigaaga ee dadka iska yimaada, fadlan imow 3:30 galabnimo. Looma baahna ballan qaadasho laakiin fadlan ogow in ay dhici karto inay jiraan codsadayaal kale ee adiga ka horeeya.
- Wixii Su'aalo ah, fadlan booqo **https://www.kingcounty.gov/depts/assessor/forms.aspx or call 206-296-3920.**

Cinwaanka dhabta ah iyo boostada waa: **Department of Assessments**
Attn: Exemptions Unit
500 – Fourth Avenue, Rm #740
Seattle, WA 98104-2384

Waxaad ku heli doontaa ogeysiis, boostada, marka codsigaaga la helo iyo mar kale markii la ansixiyo, la diido, ama la go'aamiyo in loo baahan yahay macluumaad dheeraad ah.